

# Kugu socota adigaaga leh carruur dhigata dugsi xannaano iyo firiiid



## Laga billaabo 1 Maarso 2022 waxaad u baahantahay app-ka IST Home Skola

Hadda waa ay ka fududaaneysaa sidii hore inaad soo sheegto goorta aad keeneyso ama wadaneysid canuggaaga.


Laga billaabo 1 Maarso 2022, waxaad waqtiyada ku buuxinaysaa app-ka IST Home Skola. App-ka IST Home Skola, waxaad ku awoodi doontaa inaad aragto jadwalka oo dhan oo aad ka hesho muuqaal guud oo kii hore ka fiican.

Halkaas ayaad ku soo sheegeysaa haddii uu canuggaagu buko oo uu guriga joogi doono ama ay jiraan isbeddello kale oo xagga jadwalka ah.

Horbaba ma leedahay carruur iskool dhigata?

Markaas waxaad sidoo kale haysataa app-ka, halkaas ayaadna waqtiyada ku soo sheegeysaa adeegga elektaroonigga ah beedelkiisa.

### Sidan ayaad sameyneysaa:

- Waxaad u baahantahay **taleefan gacan** (smartphone) iyo **BankID** si aad u isticmaasho app-ka.
- Markaad wax beddesho waxaad mar walba u baahantahay in aad BankID ku xaqiijisid in aad adigu adiga tihiid.  
Halkan ayaad ka sameysan kartaa BankID: [support.bankid.com](https://support.bankid.com)
- Waxaad app-ka kasoo dejisanaysaa halka aad caadi ahaan app-abka ka soo degsato ee App Store-ka ama Dukaanka Google Play-ga. Raadi: IST Home Skola.
- App-ku waa bilaash wuxuuna u eeg yahay sidan: 

### Su'aalo ma qabtaa?

Marka hore, waxaad weydiin kartaa shaqaalaha. Kontaktcenter ayaad sidoo kale caawimaad uga heli kartaa taleefan-nambarka 011-15 00 00 ama xagga e-mailka:

[norrkoping.kommun@norrkoping.se](mailto:norrkoping.kommun@norrkoping.se)

Cinwaanka booqashadu waa Rosen, Trädgårdsgatan 21, 602 42 Norrköping.

Halkan waxaa ku qoran su'aalaha iyo jawaabaha caadiga ah ee ku saabsan sida loo isticmaalo app-ka IST Home Skola:

- Dugsiga xannaannada: [norrkoping.se/tiderforskola](https://norrkoping.se/tiderforskola)
- Firiiid: [norrkoping.se/tiderfritidshem](https://norrkoping.se/tiderfritidshem)

## Soo sheeg waqtiyada

Dooro **soo dir**, wakhtiyadana **soo gudbi**.  
Ku buuxi **taariikhda billaabidda**.  
Dooro tirada toddobaadyada aad rabto inaad wakhtiyada ku buuxiso.  
Jadwalku ma isku mid baa toddobaad kasta?  
Dooro **1 todobaad**, wakhtiyada aad sheegtay waa la koobiyeynayaaye.  
**Calaamey carruurta** uu jadwalku khuseeyo oo dhan.




## Ingiriisi?

Ma rabtaa inaad luqadda app-ka u beddesho Ingiriis?  
Dooro **liiska** iyo **goobaha**  
Guji **luqad door** iyo **Ingiriis**.  
Dooro **dib u billaw**.



## Jirro ku qor

Guji **maqnaansho**, soona **sheeg maqnaanshada**.  
Dooro **canugga**, una taabo **iskoolka** iyo **firiitidka** labadaba.  
Dooro **taariikhda**.  
Soo dir




## Daar ogeysiisyada

Wax muhiim ah ha seegin, shaqa-geli ogeysiisyada app-ka (ogaysiisyada).  
Dooro **liiska** iyo **goobaha**  
Guji **ogeysiisyada**  
Calaamey **oggolaw ogeysiisyada**.



## Soo sheeg waqtiyada ku meel gaar ah

Bogga hore ee app-ka ugu sii daadeg maalinta uu isbeddelku khuseeyo xagga **kalandaariyada**.  
Guji **canugga** ee **sax waqtiga**.  
Dooro **canugga** iyo **waqtiyada**.  
Guji **OK**, soona **dir**



## Ku buuxi macluumaadka xiriirka

Ma haysataa nambar telefoon ama cinwaan-e-mail oo cusub? Ha illoobin in aad app-ka ka beddeshid macluumaadkaaga xiriirka.  
Dooro **liiska** iyo **profaylkeyga**.  
Guji **qalinka**, beddel ee **kaydi**.



## Sheeg wakhtiyada ku aaddan boos wadaag ah

Canuggu marmar ma kula degganyahay marmarna ma la degganyahay waalidka kale ee canugga? Marka aad wakhtiyada soo gudbineysid, waxaad caawimo ka helaysaa app-ka si wakhtiyadu ay u galaan toddobaadyo sax ah.

### Delat schema

Det finns en till vårdnadshavare för Hanna. Vid gemensam veckovis vårdnad, ange fördelning nedan. Om inte, gå vidare med 'Annan (skapa egen)'

### Hur ser fördelningen ut mellan er?

Varannan vecka

Varannan vecka

Två veckor växelvis

Annan (skapa egen)

